



Tilmaamaha Hagaha 2026-27

Fasallada Pre-Kindergarten - 12

Kahor Intaadan Codsan Iskoolka

1. Ka fiirso oo tixgeli dugsiyada leh adeegyada aad u baahan tahay iyo haddii gaadiid bas loo heli karo gurigaaga ama cinwaankaaga xannaanada. Isha mari sida barnaamijyada iskoollada xaafadda iyo kuwa magnetka ay isugu xigaan laga billaabo iskoolka hoose ilaa midka dhexe ilaa dugsiya sare.
2. Booqo spps.org/apply oo geli cinwaanka gurigaaga School Finder (goob laga raadiyo iskoollada) si aad u xaqiijisid Aaggaaga iyo Aagga Iskoolka Xaafaddaada, ka dibna akhri iskoollada aad xulan kartid.
3. Booqashada lagugu barayso ama lagugu tusaayo iskoolka waa fursad fiican oo aad wax badan kaga ogaan kartid iskoollada aad xiisayneysid. Booqo spps.org/openhouses oo akhri taariikhaha iyo wakhtiyada ee uu xilliga qaboobaha iskool walba dadweynaha u soo bandhigayo barnaamijyadiisa.
4. Booqo bogagga madaddaalada leh ee iskoolka si aad u sahamiso xogaha gaarka ah ee iskoolka.

Codsiga Isoollada

1. Ka codso onlaynka oo gal spps.org/apply, ama soo buuxi arjiga oo waraaqo ah, ama booqo Xarunta Meelaynta Ardayda ee cinwaankeedu yahay 2102 University Ave. West, St. Paul, MN 55114. Codsiyada waa in la helaa ama istaambo lagu soo dhejiyaa ugu dambeyn Febraayo 20, 2026, si loogu tixgeliyo mudnaanta koowaad. Qoysaska ku soo gudbiyo arjiga taariikhda kama dambeysta ee codsiga tix-gelinta leh waxaa la ogaysiin doonaa aqbalada, ama meelaynta liiska sugitaanka, bisha Abriil.
2. Ku qoro ilaa laba iskool codsigaaga. Iskoollada aad xulatid waxaa loo tixgelinayaa sida ay u kala horreeyaan. Ardayda aan laga aqbalin iskoolkii ahaa xulashadooda koowaad waxaa lagu dari doonaa liiska sugitaanka ee iskoolka.
3. Fadlan la soco in ardayda laga yaabo inaan laga aqbalin mid ka mid ah labada iskool ee ay doorteen, laakiin ardayda ku nool St. Paul waxaa loo ballanqaadayaa inay iska diiwaangeliyaan Dugsiga Dadweynaha ee Saint Paul ee fasallada K-12.
4. Soo buuxi codsi gaar ah oo loogu talagalay arday walba.
5. Fadlan si dhammeystiran u soo buuxi codsigaaga.

Shuruudaha Lagu Galo Pre-Kindergarten

Marka lagu daro Aqbalidda Mudnaanta leh ee ku dhex xusan Hagaha Xulashada Iskoollada, tixgelinta isdiwaangelinta barnaamijka Pre-K wuxuu ku saleysan yahay kuwan soo socda:

- Ardayda ku nool St. Paul
- Ardayda afar sano jirsata ugu dambeyn Sebteembar 1, 2026
- Ardayda Barata af-Ingiriisiga
- Ardayda u qalanta cunto bilaash ah ama mid qiimo jaban (eeg shaxda hoose)
- Ardayda hela adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (ECSE)

Tilmaamaha Qadada Bilaashka ah/La Qiimaha-dhimay

Baaxadda Reerka	Wadarta Dakhliga Guud ee Qoyska				
	Sannadkiiba	Bishiiba	Laba Jeer Bishii	Labadii Toddobaadba Hal Mar	Toddobaadkiiba
1	\$28,953	\$2,413	\$1,207	\$1,114	\$557
2	\$39,128	\$3,261	\$1,631	\$1,505	\$753
3	\$49,303	\$4,109	\$2,055	\$1,897	\$949
4	\$59,478	\$4,957	\$2,479	\$2,288	\$1,144
5	\$69,653	\$5,805	\$2,903	\$2,679	\$1,340
6	\$79,828	\$6,653	\$3,327	\$3,071	\$1,536
7	\$90,003	\$7,501	\$3,751	\$3,462	\$1,731
8	\$100,178	\$8,349	\$4,175	\$3,853	\$1,927
Xubin walba oo dheeraad ku ah tirada kore ee qoyska waxaad ku dartaa:	\$10,175	\$848	\$424	\$392	\$196

Xilliga Kama Dambaysta ah ee Arjiga Mudnaanta leh: Febraayo 20, 2026

Student Placement Center - Saint Paul Public Schools, 2102 University Avenue W. St. Paul, MN 55114

